



## Jaraa'idka EdTech Magazine oo ka Sheekeeyey Sare u Qaadista soo Socota ee lagu Samayn doono Teknoolojiyadda Fasalka ee PPS

Iyadoo ay mahadda iska leeyihiin deeqsinimada cod-bixiyayaashu, Dugsiyada Dadwaynaha Portland waxay bilaabeen inay isku diyaariyaan waxbarista aafada cudurka kadib, ayuu sheegay maqaal ku qornaa EdTech Magazine.

22-ka Juun maqaal ayaa lagaga sheekeeyey qorshayaasha PPS ee ah inay sare u qaaddo teknoolojiyadda fasaladeeda iyo helitaanka internetka oo ka qayb ahaa Curaarta Dugsiga 2020 ee cod-bixiyayaashu ansixiyeen. Qoraa Wylie Wong ayaa waraystay Don Wolff, oo ah Madaxa Sarkaalka Teknoolojiyadda PPS, kaasi oo ka hadlay sida PPS wax uga qabatay caqabadaha teknoolojiyadda ee ay yeelatay waxbarashada onlaynka ah intii lagu jiray aafada cudurka COVID-19. Wolf wuxuu u sheegay Wong:

"[Waxbarashada onlaynka ah] waxay baddashay gabi ahaanba qaabka aanu wax u dhigno. immika, macallimiintu waxay qaadan karaan wixii ay soo barteen sanadkii hore, oo iyagoo adeegsanaya qalab fasal oo cusub, waxay ka abuuri karaan kaqaybgal dheeraad ah iyo waxbarasho xiiso leh fasalka dhexdiisa."

Cusboonaysiinta teknoolojiyadda oo laga maalgaliyey curaarta, taasi oo la qorsheeyey aafada cudurka kahor, waxay siin doontaa PPS bilaw hore oo ku saabsan buuxinta baahiyaha teknoolojiyadda ee aafada cudurku ku qasabtay degmo dugsiyeedyadu inay waajahaan. Wong wuxuu qoray:

Si ay taas wax uga qabato, degmadu waxay ku rakibi doontaa Wi-Fi fasal kasta, iyo borojaktar dallacan iyo shaashad cusub, kombiyuutar Chromebox ah iyo aalad wadaagidda 2 shaashadood oo Airtame ah oo loogu talagalay macallimiinta si ay bilaa xarig ugu wadaagi karaan fiidyawada iyo websaytyada, ayuu Wolff dhahay. Qol kasta waxa sidoo kale ku jiri doona nidaam cod-baahiye ah oo makarafoon macallinka loogu talagalay leh.

Ka akhri [maqaalka oo dhammaystiran halkan EdTechMagazine.com](https://www.edtechmagazine.com).